



wuu liibaanay haduu ka run sheego

Dalxa Binu Cubaydu Allaahi -Allaha ka raali ahaadee -wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- nin reer Najdi ah ayaa u yimid oo madax basaasan, oo aan maqlaynay codkiisa wayn, oo aanan fahmayn wuxuu sheegaayo ilaa uu u soo dhawaaday Rasuulka scw, waaba isagoo Islaamka wax ka waydiinaya, wuxuu yiri Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-: "salaado shan ah maalintii iyo habeenkii" wuxuu yiri: waxaan iyaga ahayn miyaa igu waajiba? wuxuu ku yiri: "maya, adigoo suno tukada maahee, iyo soonka bisha ramadaan", wuxuu yiri: soon kale ma la igu leeyahay? wuxuu ku yiri: "maya, adigo suno sooma maahee, wuxuuna u sheegay Rasuulku Sakada, wuxuu yiri wax kale-oo sako ah- ma la igu leeyahay? wuxuu ugu jawaabay: "maya, adigo sadaqada badsada maahee", wuxuu yiri -dalxa-: ninkii waa islaabay oo dhaqaaqay, isagoo dhahaya: Ilaahay ayaan ku dhaartee intaa waxna ku darimaayo waxna ka dhimi maayo, Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa yiri: "wuu liibaanay haduu ka run sheego".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nin reer Najdi ah ayaa u yimid Rasuulka-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ninkaasoo timo basaasan lahaa, codkiisuna aad u dheeraa, wuxuu sheegayana aan la fahmayn ilaa uu Rasuulka u soo dhawaaday, wuxuuna wax ka waydiiyey arkaanta Islaamka?. Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ku bilaabay salaada, wuxuuna u sheegay in Ilaahay ku farad yeelay habeenkii iyo maalintii shan salaadood. Wuxuu yiri: ma igu waajibaa salaado kale oo aan shantaa ahayn? Rasuulku scw wuxuu ku yiri: maya inaad salaadaha sunada ah tukato maahee. Rasuulku -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka dib wuxuu ku yiri: waxaa Ilaahay kugu waajibiyey soonka bisha ramadaan. Ninkii wuxuu yiri: soon kale oo aan intaa ahayn miyaa igu waajiba? wuxuu yiri: maya, inaad soon suno ah soontid maahee. Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka dib wuxuu sheegay Sakada. Ninkii wuxuu yiri: ma sadaqo kale ayaa igu waajib ah oo aan Sakada faradka ah ahayn? wuxuu yiri: maya, inaad sadaqaysato maahee. Ninkii markuu ka maqlay Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wax yaabahaas faradka ah wuu jeensaday wuuna dhaqaaqay, wuxuuna Ilaahay ugu dhaartay inuu intaa laasimi doono isagoon wax ku darin waxna ka dhimin, Rasuulka ayaa yiri intaa ka dib: haduu ka run sheego wuxuu ku dhaartay wuxuu ka mid ahaanayaa kuwa liibaanay.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

